

Self-directed supports (Taageerooyinka shaqsiga hago) ee Daryeelka La maareeyay

(Self-Directed Supports in Managed Care)



Self-directed supports (Taageerooyinka shaqsiga hago) (SDS) waa dooq loogu tallogalay dadka ka diiwaangashan barnaamijyada daryeelka muddada dheer ee la maareeyay Wisconsin, oo ay ku jiraan:

- Family Care.
- Partnership.
- PACE (Program of All-Inclusive Care for the Elderly) (Barnaamija Daryeelka Dhammaan Loo dhanyahay ee Waayeelka).

SDS waxay ku siinayaan xakameyn badan oo dhinaca adeegyada iyo taageerada aad heshid.

Sida SDS u shaqeyso

Markii aad is diiwaangelisid barnaamija daryeelka muddada dheer, waxaad dooran kartaa managed care organization (ururka daryeelka la maareeyay MCO). MCO gaaga ayaa kaa caawinayo inaad raadisid oo aad heshid adeegyada aad u baahantahay. Iyo SDS, waxaad la shaqeyneysaa MCO-gaaga si aad u go'aansatid adeegyaddee aad jeelaan laheyd inaad maareysid. Barnaamijaaga ayaa kaa caawinayo barashada sida loo iibsado adeegyadaada iyo taageerooyinka gaarka ah ee xirmada faa'idada.

Waa kuwaan waxaad filaneysid:

Qorshaha gaarka ah ee SDS

MCO walba wuxuu leeyahay qorshahooda gaarka ah ee lagu bixinayo SDS. Waa inay lahaadaan qaab aad ku sameysid kuwa xiggo:

- Dooro oo kireyso shaqaalahaaga gaarka ah, kaasoo noqon karo qoyska, saaxibada, xaa fada, ama hay'adaha.
- Tababar oo kormeer shaqaalahaaga taageeradaada sida ay kuu daryeelaan oo la daboolo baahiyahaaga.
- Shaqaalaha lacag bixinta ee gudaha miisaaniyadaada oo raadraac isticmaalida.

Dooqa adeegyada aad shaqsi ahaan hagtid

Sida ku saleysan baahiyahaaga la qiimeeyay, waxaa kuu suurtogeli karto inaad hagto dhammaan adeegyada ama qeyb ahaan. Tusaale ahaan, waad hagi kartaa adeegyadaada daryeelka gaarka ah laakiin kooxda daryeelkaaga hakuu maareeyeen bixiyayaasha kaa caawiyo inaad heshid saadadka caafimaadka.

(Ku sii soco bogga 2)



WISCONSIN DEPARTMENT
of HEALTH SERVICES

Koox daryeel ee adiga ku taageero

Haddii aad dooratid inaad isticmaashid SDS, kooxda daryeelkaaga waxay:

- Sharax waxa laguu heli karo sida ku saleysan baahiyahooda la qiimeeyay.
- Hubi inaad ku jirtid miisaaniyadaada la heli karo si loo daboolo baahiyaha caafimaadka iyo badqabka.
- Kaa caawiyo raadinta taageero kale ee lagu maareeyo SDS sida ku saleysan adeegyada (haddii ay kuwa jiraan) aad go'aansato inaad is hagto. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah fiscal employer agents (hay'ada badrooniga maaliyada) kaasoo ka caawya waraaqaha shaqada kireysiga cusub, joornaatiga, iyo wax badan.



Xadeynada SDS

MCO-gaaga ayaa gelin karo xadeynada dooqa SDS haddii:

- Wuxaan ku isticmaaleysaa wax ka badan waxa miisaaniyadaada ku jiro.
- Wuxaan isticmaashay illaha barnaamijka oo qaab aan la ogoleen.
- Wuxaan isticmaashay illaha barnaamijka qaab geliyo caafimaadkaaga iyo badqabkaaga halis.
- Qof kale ayaa kuu gaarayo go'aan aan ku saleysneyn waxa aad rabtid.

MCO-gaaga ayaa kula shaqeynayo marka waad garaneysaa sida loo maareeyo SDS oo looga fogaado sadex xadido.

Qoraalada:



WISCONSIN DEPARTMENT
of HEALTH SERVICES